



# Su'aalaha aalaaba la isweydiyo ee ku saabsan tallaalada COVID-19 ee Oregon

FAQ-gaan wuxuu ka jawaabaa su'aalaha badanaa la is weydiyo ee aan ka helnay dadka curyaanka ah

## S1. Sababtee u qaataa tallaalka COVID-19?

J1. Tallaalka waa qaab badqab iyo wax ku ool ah oo adiga iyo dadka aad jeceshahay badqab uga haynayo COVID-19. Waxaad ku jiri kartaa halis sareyso oo inuu kugu dhaco COVID-19 haddii aad ku nooshahay goobta daryeelka dadka badan ama aad u dhawaatay bixiyayaasha daryeelka aan tallaalnayn. Waxaad sidoo kale halis sareyso ugu jiri kartaa jirooyin daran haddii aad qabtid sonkorow, kansar, cudurka wadnaha, cayilka ama curyaannimada caqliga ama kobaca. Tallaalku wuxuu xoojinayaa jirkaaga si uu ula dagaallamo COVID-19 kaagana difaaco inaad jirrato. Iyo haddii aad ka illaalisid nafsadaada COVID-19, waxad sidoo kale ku caawineysaa illaalinta kuwa kaa ag dhow.

## S2. Tallaalada COVID-19 ma badqab baa?

J2. Dhammaan tallaallada COVID-19 ayaa la tijaabiyey si loo hubiyo inay badqab yihiin oo waxtar leeyihiin. Tobanaan kun oo dad ah ee ka kala socdo qomiyado badan' da'aha, iyo bulshooyinka ka qeybqaatay tijaabinta tallaalka. Malaayiin dad ah ayaa hadeer qaatay tallaalada COVID-19. Kama qaadeysid COVID-19 tallaalka.

## S3. Miyay dadka curyaanka ah ama qabo baahiyada caafimaadka adag ka qeybqaateen tijaabooyinka caafimaadka?

J3. Haa. Tallaalka waxaa lagu tijaabiyay tobanaan kun oo ka qeybqaatayaal oo qaba xaaladaha caafimaadka daran, laakin wargelinada tijaabada ayaan si cad u qeexeynin xaaladahee.

## S4. Miyaa tallaalka lagu duri karaa meel kale oo aan ka aheyn garabka?

J4. Haa. Tallaalka waa in laga qaataa muruq (tus, cirbada muruq ka qaadashada). Dadka weyn, muruqa garabka (ee garabka kore) ayaa lagu talliyay oo tallaalida muruqa joogtada ah. Bawdada hore ayaa sidoo kale la isticmaali karaa.

## S5. Ka waran haddii aan hadeer qaadanayo daawooyin? Miyay tallaalada weli badqab ii yihiin aniga?

J5. Ma jiraan xog la heli karo hadeer ee ku saabsan isdhaxgalada tallaalka oo kaniiniyo ama daawooyin walba. Takhasusyada waxay u maleeyaan tallaalka inuu badqab yahay xittaa haddii aad qaadaneysid daawooyin kale. Tallaalka ayaa laga

yaabaa inuusan shaqeyn sidoo kale haddii aad qaadaneysid daawooyin caburinaya difaaca jirka.

**S6. Ka waran haddii aan leeyahay xaalada caafimaadka jirtay? Miyay tallaalada weli badqab ii yihiin aniga?**

J6. Haa. Tallaal walboo COVID-19 ee FDA-ay ansixiyay ayaa la siin karaa dadka qabo xaaladaha caafimnaadka daran oo aan [diideynin](#) tallaalka. Walaacya walboo gaar ah waa in lagala hadlaa dhaqtarkaaga.

**S7. Miyuu tallaalku iga ilaalin doonaa inaan qaado COVID-19?**

J7. Inkastoo illaalada aysan aheyn boqolkiiba 100%, ee dhammaan tallaalada COVID-19 ee lagu ansixiyay Mareykanka si sareyso ayay wax ku ool ugu yihiin ka hortaga cudurka halista ah iyo isbitaal geynta.

**S8. Maxay yihiin waxdhimaalada tallaalka COVID-19?**

J8. Kadib markaad qaadato tallaalkaaga, waxaa laga yaabaa inaad ku yeelato nabar gacanta lagaa tallaalay. Dadka qaarkood waxay sidoo kale dareemayaan daal ama xanuun ama qabaan qandho dhowr maalmood ah. Tani lama macno aha inaad jirran tahay. Waxay ka dhigan tahay inuu tallaalku shaqeynayo si uu jirkaagu u caafimaado. Saameynada caafimaadka halista ah waa dhif.

**S9. Sidee tallaaladu u shaqeeyaan?**

J9. Tallaalada wuxuu unugyadayada u sheegaa inay sameeyaan borotiin aan dhib lahayn. Habdhiskayaga difaaca jireed wuxuu arkaa borotiinada wuxuuna dhisaa unugyada difaaca jirka ee xasuusan doona sida loola dagaalamo fayraska COVID-19 haddii aan cudurka qaadno.

**S10. Waxaan horey u qabay COVID-19. Miyaan weli u baahannahay inaan is tallaalo?**

J10. Haa. Ma garaneyno sida raagida ama xooganaanta difaaca dabiiciga ah yahay. Xitaa haddii aad la xanuunsaneyd COVID-19, tallaalka wuxuu ku caawinayaa inuu kaa illaaliyo caabuqa noocyada kala duwan ah. Sug ilaa aad si buuxda uga bogsato COVID-19 kahor intaadan tallaal qaadan.

**S11. Xagee talaalka ka heli karaa??**

J11. Waxaad soo wici kartaa 211 ama 866-698-6155 ama ka fiiri [qariirada raadiyaha tallaalka](#) si aad u heshid bixiyaha tallaalka ee kuu dhow. Qariirada waxaa lagu helayaa 12 luuqadood. OHA ayaa ku bixin karto warbixin qaabab kale sida fasiraadaha, daabacaada balaaran, ama farta camoolaha. Kala xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka 971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.

**S12. Sidee ayaan ku ogaanayaa haddii goobta tallaalka la tagi karo?**

J12. Bixiyayaasha tallaalka COVID-19 ayaa looga baahanyahay inay ahaato cabashada-ADA.

**S13. Maxaan sameeyaa haddii aan imaado balanta oo goobta aysan qaabili karin baahiyadeyda?**

J13. La xiriir [Barnaamijka Baaraha cabashada OHA](#) adiga oo ka soo wacayo leenka fariinta 877-642-0450 TTY 711 ama i-meel u soo dirayo OHA.OmbudsOffice@dhsosha.state.or.us

**S14. Ka waran haddii aysan iisuurtogaleynin inaan ka tago gurigeyga? Sidee ayaan ku qaadan karaa tallaalka?**

J14. La xiriir [maamulkaaga caafimaadka dadweynaha](#). Macaamiisha Medicaid waa inay la tashtaan maareeyaha dacwadda.

**S15. Immisa ayey ku kacaysaa? Ma la iga rabaa inaad lahaado caymis?**

J15. Tallaalka wuxuu u yahay bilaash qof walba. Laguguma soo dallici doono lacagta ballanta ama tallaalka. Uma baahnid caymiska caafimaadka si aad tallaal u heshid, laakin haddii aad leedahay caymiska caafimaadka, la imaw kaarkaaga. Bixiyaha ayaa u soo diri karo caymiskaaga qarashka laguugu siiyay tallaalka.

**S16. Ma la iiga baahan yahay inaan keeno aqoonsi si aan u caddeeyo u-qalmiitankayga?**

J16. Maya. Uma baahnid inaad la imaatid cadeynta u qalmida. Waxaa lagu weydiin karaa inaad bixisid aqoonsiga shaqsiga, laakin laguma celinayo haddii aadan laheyn aqoonsiga.

**S17. Ma la iiga baahan yahay inaan bixiyo lambarka sugnaanta bulshada si aan u helo tallaalka?**

J17. Maya. Uma baahnid lambarka amniga bulshada.

**S18. Maxaa ku jira tallaalada COVID-19?**

J18. Tallaalada Pfizer iyo Moderna waxaa laga sameeyay “RNA,” kaas oo u sheego jirkaaga inuu sameeyo qeyb waxyeelo laheyn oo fayras ah, taas oo aad ku dhisaysid difaaca. Tallaalka Johnson & Johnson wuxuu adeegsadaa fayras naga dhigaya kuwa iska difaaco COVID-19. Tallaalada ma badelaan DNA-gaaga oo ma wato fayraska nool ama waxyaabo walboo xayawaanka ah.

**S19. Ma u baahannahay irbad labaad oo tallaalka ah? Sidee ku ogaan doonaa goorta iyo meesha aan aadayo?**

J19. Wixii tallaalada Pfizer iyo Moderna ah, waxaad u baahaneysaa inaad qaadatid laba cirbado. Waxaad qaadan doontaa irbada labaad 3 ama 4 toddobaad ka dib markaad qaadatid mida koowaad. Waa kuu muhiin inaad qaadatid labada irbadood. Rugta caafimaadka aad ka heshay irbadaada koowaad ayaa kula soo xiriiri doonta si ay u muddeeyaan irbadaada labaad. Tallaalka Johnson & Johnson wuxuu u baahanyahay kaliya hal tallaal.

Waa lagula socodsiin doonaa nooca tallaalka aad qaadanayso iyo nooca dabagalka, haddii ay jirto, aad u baahan tahay inaad hesho. Waxaad heli doontaa cadeynta tallaalkaaga. Ku hayso kaarka cadeynta tallaalkaaga si badqab ah.

**S20. Waxa la sameeyo haddii aan lumiyo kaarka talaalkeyga?**

J20. Haddii aad lumisid ama aad waxyeeshid kaarkaaga tallaalka, waxaad u isticmaali kartaa diiwaanka tallaalkaaga sida cadeyn. Halkaan waa sida loo helo diiwaankaaga (kaararka badelida CDC lama heli karo):

- Ka hubi bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga, ama websaydkooda, oo diiwaanka tallaalkaaga.
- Ka raac tilmaamaha bogga [Illaha Tallaalka OHA](#) . Waxay qadaan kartaa 5 maalmood inaad ku heshid diiwaankaaga.
- U soo wac 211 caawinta luuqadaha aan ka aheyn Ingiriis.

**S21. Kadib markaan qaato tallaalka, miyaan joojin karaa xirashada afxirka oo ma bilaabi karaa inaan mar kale la kulanka kooxaha dadka ah?**

J21. Kadib markii si buuxdo lagu tallaalo (labo isbuuc tallaalkaaga ugu dambeeyo kadib), waxaad la booqan kartaa gudaha dadka kale adiga oo aan xirneyn maaskaraha ama kala fogaanshaha jireed. Waxaad weli u baahantahay inaad xiratid maaskaro goobaha qaar.

**S22. Si buuxdo ayaan u tallaalannahay iyo difaaca jirka daciifay. Miyaan sii wadaa inaan ku xirto maaskaro agagaarka dadka kale?**

J22. Tallaalada ayaa ka waxtar yaraan dadka qabo xaaladaha difaaca jirka daciifay ama cida qaadata daawooyinka hoos u dhaca difaaca jirka. Shaqsiyaadka waa inay kala hadlaan bixiyayaashooda daryeelka caafimaadka halistooda gaarka ah sida ku saleysan taariiqda caafimaadkooda iyo haddii ay tahay inay ku xirtaan maaskaro dadweynaha.

**S23. Miyuu qofka taagaradeyda iwadi karaa si aan u soo qaato tallaalka?**

J23. Haa. Shaqaalaha taageerada ayaa isticmaali karo waqtiga joogtada qorsheysan si ay kuugu geeyaan balanta tallaalkaaga. Wixii xubnaha Medicaid, saacadaha taageerada dheeraadka ah ayaa loo heli karaa. Kala xiriir shaqaalaha dacwadaada wixii warbixin dheeraad ah.

**S24. Miyaan wadan karaa illaha kaloo taageerada ah, oo ay ku jiraan laakin kama xadidno xayawaanada adeega, kaararka xiriirka, turjubaano, iwm.?**

J24. Haa.

**S25. Miyuu qofka taagaradeyda qaadan karaa tallaalka isla waqtiga aan qaadanayo?**

J25. Haa. Ma jiro balamo looga baahanyahay farmashiyo badan. Xubnaha Medicaid ee guriga dhexdiisa, Qorsheeyayaasheena Tallaalka ayaa sidoo kale idin jadmaweyn karo labadiinaba isku waqtiga. Soo wac 503-890-0491.

**S26. Miyuu qofka taagaradeyda ila joogi karaa kadib markii aan qaato cirbadeyda haddii ay jiraan saameynada caafimaadka?**

J26. Haa. Shaqaalaha taageerada ayaa isticmaali karo waqtiga joogtada qorsheysan si ay kuula joogaan tallaalkaaga kadib. Wixii xubnaha Medicaid, saacadaha taageerada dheeraadka ah ayaa loo heli karaa. Kala xiriir shaqaalaha dacwadaada wixii warbixin dheeraad ah.

**S27. Xagee ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?**

J27. Wixii warbixin dheeraad ah, booqo [covidvaccine.oregon.gov](https://www.covidvaccine.oregon.gov) (af Ingiriis) ama [vacunacovid.oregon.gov](https://www.vacunacovid.oregon.gov) (af Isbaanish). Waxaad sidoo kale wici kartaa 211 ama 866-698-6155 wixii warbixin ah oo luuqad walba ah.

Xaquuqaha Curyaanimada Oregon, Ogow Xaquuqahaaga:  
<https://www.droregon.org/covid-19-rights>

ODDS Way Ogtahay Xaanshida Illaha Xaquuqahaaga:  
<https://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/ODDS%20Resource%20Library/Covid-Medical-Rights-Resources-Sheet.pdf>

Haddii aad qabtid walaacyo ama cabashooyin, la xiriir [Barnaamijka Baaraha cabashada OHA](#) adiga oo ka soo wacayo leenka fariinta 877-642-0450 TTY 711 ama i-meelka [OHA.OmbudsOffice@dhsosha.state.or.us](mailto:OHA.OmbudsOffice@dhsosha.state.or.us).

**Helitaanka dukumiintiga:** Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka 971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).